# *DARDAARAN DIINI AH OO KU SOCDA JAWHARTII LADHAWRAY(walaasha muxajabada ah oo daahirka cafiifada ah)*

1. **Ka Digtoonow** walaashayeey waraabaha banii aaDamka ah ee kuugu gabanaya sameecada talefonka
2. **Ka Digtoonow** walaashayey xanta, iskudirka, cayda, nacaladida iyo habaarka xaraamka ah xusuusnow in arintaas ay kamid tahay sababaha dumarku naarta ugu batteen mucaad ibnu jabal wuxuu ku yiri nabiga scw ,miyaa naloo qabanayaa waxaan ku hadlayno rasuulku wuxuu ku yiri mucaad(hooyadaa ha kuwaydo mucaadooow dadka naarta waji waji miyaa loogu kufiyaa ama wuxuu yiri manaakhirtooda (sansan )waxay carbadoodu gaysteen maahane).
3. **Ka Digtoonow** walaaley ku labisashada cabaayada muzayinada ah (wax qurxisa )fatwo ayaa kasoo baxday culimada xarimaysa ku labisashadeeda maxaa yeelay may aha xijaab sharci ah sabab wayn ayayna utahay fitno iyo dayac.
4. **Ka Digtoonow** walaaley labiska ciriiriga ah iyo kuwa gaagaaban iyo kuwa layska dhex arki karo iyo kuwa aan sharciga ahayn naar jidkeed waayee.
5. **Ka Digtoonow** walaaley shaqaalaha iyo darawaliinta oo guryaha lakeeno sabab ayay uyihiin kharaabka guriga(burburka guriga)
6. **Ka Digtoonow** walaaley dhagaysiga hadalka iyo heesaha xaaraamta ah kaxifdi xubnahaaga oo dhan wuxuu allaah xarimay way kugu marqaati furayaa(xubanahaagu)maalinta qiyaamada.
7. **Ka Digtoonow** walaaley majalaadka(joornaalada)hoobinta middaas (majaladaha)oo kuugu yeeraysa fasahaad iyo dulinimo lana dagalamaysa wanaaga.
8. **Ka Digtoonow** saaxiibada xun xun iyo iyo kuwa dariska kula ah waxba kuuba tari doonaan aduun iyo aakhiro aan ka ahayn inayn kordhiyaan kayda danbigaaga.
9. **Ka Digtoonow**........... tagitaanka xafladaha iyo farxadaha munkarka ah(xunxun)macsi allaah ayaa kusugane.
10. **Ka Digtoonow**.........isku ekeysiinta raga sida xirashada sarwaalka iyo gaabinta timaha iyo inaad ka dhigto timaha raga oo kale.
11. **Ka Digtoonow**.......... caasinta ninka ama waligaaga (cida mas,uulka kaa ah)hadayna ku amrayn macsi.
12. **Ka Digtoonow**.......... INAAD GURIGA SOO GALISO qaraabada ama kuwa aan maxaarimtaada ahyn(aabaha ama adeerka laxmiga ah ama abtiga laxmiga ah oo kale kuwaan ahayn lama ogala)
13. **Ka Digtoonow**..........isku darsamida raga iyo dumarka meelaha ziyaarooyinka qoysaska iyo suuqyada iyo meela kale.
14. **Ka Digtoonow**...........shaashada talafashanka iyo fiidiyowga iyo enternetka iyo kuwa kale.
15. **Ka Digtoonow**...........inaad ufaafiso(oga sheekayso) sirta ninka(lamaanaha) iyo guriga dad kale.
16. **Ka Digtoonow**........... KIBIRKA IYO KADSOOMIDA IYO XAQIRITAANKA KUWA KALE (XAQIRITAANKA DADKA)
17. **Ka Digtoonow**........... zinada waa jariimada(danbiga) ugu xun iyo guriga oo laga baxo ninka oon idmin.**Ka Digtoonow**...........aadida saaxiriinta iyo wax sheegaha(faalowga)iyo curaafiinta.
18. **Ka Digtoonow**...........labisashada cabaayada garbaha iyo ciriiriga fatwo ayaa kasoo baxaday culimada xarimaysa labisashadeeda.
19. **Ka Digtoonow**...........isticmaalida catarka(baraafunka)markaad guriga ka baxayso.
20. **Ka Digtoonow**...........badalida abuurka allaah waa adiga oo qabta(jara)xaajibka ama taflajka rasulkuna scw wuu nacaladay faalijada iyo mutaflijada naamisada mutanimasada).
21. **Ka Digtoonow**........... inaad jirka mariso wax diidaya inay waysadu jirka wada gaarto.

## *DARDAARAN DIINI AH OO KU SOCDA JAWHARTII LA DHAWRAY (walaasha muxajabada ah oo daahirka cafiifada ah)*

1) **Ku Dadaal** walaashayey salaada inaad gudato waqtigeeda(tukato)khushuuc iyo xasilooni.
2) **Ku Dadaal** ........ tawbada iyo allaah inaad u istiqfaarato iyo xus(alle)markasta.
3) **Ku Dadaal**................aqrinta qur,aanka kariimka ah maaalinkasta asagu(quraanku)waa nuurka qalbiga waa tagsiiyahay murufta iyo humuumta.
4) **Ku Dadaal**................aqrinta kitaabada islaamiga ah ee wax tarka iyo faaiidada leh.
5) **Ku Dadaal**................dhagaysiga cajaladaha wax tarka leh sida cajaladaha quraanka iyo muxaadarooyin iyo nadwooyinka iyo dhagaysiga cidaacada quraanka kariimka.
6) **Ku Dadaal**................ salaatulaylka rakcooyin yarba hanoqdaane
7) **Ku Dadaal**................ labada rakco ee duxaaga(barqadii) waa salaadii kuwa allaah u noqdee(awaabiinta)
8) **Ku Dadaal**.............. SUNOOYINKA rawaatibta see salaadaha faradka ah ka danbeeya kana horeeya.
9) **Ku Dadaal**...............xirashada xijaabka islaamiga ah ee saxda ah ee ku dhamaystiran meelkata(kaamil ka ah meelkata)
10) **Ku Dadaal**..............sadaqada iyo qaybinta kitaabada yaryar ee islaamiga ah.
11) **Ku Dadaal**.............. adkaarta subixii iyo galabkiii iyo tan seexashada iyo markay ciriiri(dhib ku qabsado)iyo murugta iyo humuumta.
12) **Ku Dadaal**..............DHIHIDA runta iyo qirashada xaqa markasta.
13) **Ku Dadaal**..............ku tarbiyaynta ilmaha tarbiyada islaamiga ah iyo baroida qoraanka kariimka ah iyo akhlaaqda wanaagsan ilaa ay noqdaan ubad wanaagsan oo ku anfaca noloshaada iyo geeridaada ka dib.
14) **Ku Dadaal**.............. adeecida lamaanahaaga(wax kamaqlida ninkaaga)iyo xifdinta sirtiisa iyo inaadan ka xanaajin waxaaad heli ajir allaah xagiisa kaaga yimaada.
15) **Ku Dadaal**..............kafaalad qaadida agoonta iyo unaxariisashada dhibanaha qaraabada kamidka ah iyo dariska.
16) **Ku Dadaal**..............unaseexaynta iyo doosinta iyo ugu yeerida ilaahay xagiisa kahayrka(dadka dacwada ka gudo oo khayrka ugu yeer)
17) **Ku Dadaal**..............kadaahirinta gurigaaga dhaman waxyaabaha hortaagan oo kuu diidaya inay malaa,iktu soo gasho gurigaaga.
18) **Ku Dadaal**..............kafogaynta gurigaaga wax yaabaha qaabilida hawada sida diishka.
19) **Ku Dadaal**.............. ku aqrinta suuratul baqara gurigaaga markasta shayaadiinta ayay guriga ka eryaysaaye.
20) **Ku Dadaal**..............gudashada xajka iyo cumrada intaadan dhiman kahor.

WAXAAN ALLAAH WAYDIISANAYAA TABAARAKA WATACAALAA INUU KUGU HANUUNIYO WADADA SAXAN IYO INUU KU TUSIYO ARINKAAGA MIDKA UGU SAXAN ASAGA AYAA ARINTAAS WALIGEEDA AH AWOODANA WASALLAAHU WASALAMA WABAARAKA CALAA NABIYINAA MUXAMAD IBN CABDILLAAH WACALAA AALIHI WASAXBIHI WASALLAMA TASLIIMAN KATHIIRAA.

Waxaa Qoray: Walaashiin Umu Cuzeyr